Folkhälsomyndigheten

# Caafimaadka dadwaynaha ku nool dalka Iswiidhan waa sidee?

Si jawaabta su`aashaas aan (u)helno awgeed, waxaan u baahanahay in aan adiga ku weydiino: "Sidee tahay?" Jawaabtaadu waxay naga caawini doontaa inaan fahamno sida dareenka caafimaad ee bulshadu u yahay iyo waxa loo baahanyahay sidii sare loogu qaadi lahaa tayada caafimaadka dhammaan dadka ku nool dalka Iswiidhan.

Sahankayagan oo lagu magacaabo Sahanka qaran ee caafimaadka dadweynaha ”Caafimaad ku salaysan shuruudo isku mid ah” (Hälsa på lika villkor) dad bakhtiyaa nasiib lagu doortay oo ka mid ah bulshada ayaa ka jawaabaya su’aalo ku saabsan caafimaadka iyo arrimaha saamayn ku yeesha caafimaadka. Sahankan waxaa fulinaya Hay’adda Caafimaadka Dadweynaha iyo maamullada gobollada dalka Iswiidhan. Hay`adda arrimaha tirakoobka, SCB, ayaa hawlgallada dirista foomka ku qoran su`aallaha u qaban doonto hay`adda.

Miyaad heshay foomka su`aallaha ku qoran? Anaga ku hawlan sahminta waxan xajinaa sirta xirfadda, taasoo macneheedu ay tahay in jawaabtaada hab sir ah loo maarayn doono. Natijada waxaa loo soo bandhigi doonaa qaab kooxeed oo waawayn, taasoo marna aan suurtagelin doonin ogaanshaha sida qof gaar ah u su`aallaha uga soo jawaabay. Najijada waxaa loo adeegsan doonaa tirokoob iyo cilmibaaris dartooda oo ku saabsan caafimaadka iyo xaaladaha noolasha.

Maadaama lagu soo diray qoraal-waydiimaha, jawaabtaada aad iyo aad ayay muhim u tahay, taasoo kaalin ka geysan doonta garashada xaalada caafimaad ee kooxaha kala duwan ee bulshada ku dhex nool. Ka qaybgelistaada waxay kaloo kaalin ka geeysan doonta sare u qaadka tayada caafimaadka iyo fayow-qabka dadwayanaha dalka Iswiidan ku nool.